



Caashuurada Ahlus Sunnaha iyo Ta Ahlul Bidcah

Maalinta Caashuuraa waxa la diley Xuseen ibnu Cali ibnu Abii Taalib inanka Rasuulku ﷺ awowga u ahaa. Shakki kuma jiro dilkiisu in uu ahaa dembi weyn oo fool xuma ah. Rasuulka ﷺ ayaa sheegey Xassan iyo Xuseen in ay inamadiisa ahaayeen waayo inantiisi ayaa dhashay. Waxay ahaayeen kuwii janada loogu bishaareeyey adduunyada dusheeda iyaga oo maraya. Kuwa diley shakki la'aan in ay ku dambaabeen oo dambi weyn faraha ay la galeen laakin Xuseen markii la diley shaydaan baa uga faaideystey qeybo ummada ka mid ah. Laba ayey u qeyb sameen, qeyb xuseen markaa uu dhintay, qaar lumey waxaa ayna la yimaadeen laba bidco.

Qolo waxa ay yidhaahdeen maalinta caashuuraa waxaanu u baroor diiqeynaa Xuseen ibnu Cali. Maxay ugu baroor diiqayaan? Wixii dhaqanka jaahiliyada ahaa ee Rasuulku la dagaalamey قال النبي صلى الله عليه وسلم ليس منا من لطم الخدود وشق الجيوب ودعا بدعوى الجاهلية “Naga mid maaha marka ay musiiibo dhacdo qofka dhabannadiisa garaaca, maryahana jeex jeexa oo u baroorta sidii jaahiliyada” {Bukhaari iyo Muslim}. Waxay yidhaahdeen waxaanu ku xuseynaa murugo muujin, qeylo, oohin, isharaadin, qasaaid baroor diiqo la akhriyo iyo mid taaba ka daran oo ah in la caayo saxaabada Rasuulka ﷺ oo Abu bakar iyo Cumar laga bilaabo. Oo cid aan dilkii Xuseen dembi ku lahayn arintaasi la galiyo. Wuxuu sheegey shaykh Islaam ibnu Taymiyyah “Dadkaa arintaa



bilaabey u jeedada ay kalahaayeen in ay ahayd albaab fitno in ay ku furaan muslimiinta oo dadka muslimiinta ay kala geeyaan”. Wuxuu yidhi Ibnu Munajab raximahullah: Masaabti ku dhacdey anbiyada Ilaahay qaar baa la diley Ilaahay ma sharciiyeynin Nebiguna ﷺ ma sheegin in baroor diiq loo dhigo oo tacsii loo qabto maalin maalmaha sanadka ka mid ah cidda ka soo sokeysa ka waran? Waajibna ma aha, sunnana ma aha, mubaaxna ma aha ee waa BIDCO ka mid ah bidcooyinka. Kuwaasi waa Shiicada rawaafida ah kufriga iyo gaalnimada la jahra ee aan qarsaneyn oo kor u qaada.

Koox labaad ayaa jirta ahluh sunnah ayey isku tiriyaan. Waxa ay weriyeen oo loo soo weriyey ayagan axaadis mawduuc ah axadiis la dajiyey oo wakhtigii saxaabada aan jirinba. Axaadiistaasi oo ay ku dul dhiseen acmaal ay leeyihiin maalinta caashuura in la sameeyo iyaga oo ka horgeyneya taa ay shiicadu ay sameeyeen. Shaykh Islaam ibn Taymiyyah wuxuu yidhi baadil ayey ka hor geeyeen, bidcana bidca ayey ka hor geeyeen. Labada baadil iyo labada bidco haba kala sii darnaadaan laakin labaduba waa baadil. Wuxuu yidhi ibnul Qayyim Raximahullaah “Labada kooxood waa ahluh bidac oo bidco la yimid iyo waxa aanu Ilaahay jideynin. Ahluh sunnah waxa ay sameeyaan maalinta caashuura wuxuu rasuulku ﷺ amrey oo soom ah wuxuu shaydaan farey oo bidcana ah waa ka dheeraadaan.” Mana jiro hal xadiis oo ka hadlaya maalinta caashuura oo saxiix ah oo Rasuulka ﷺ ka sugnaatey oo aanan ahayn xadiiska soomka caashuura sheegeya. Waa qaacido guud ee qaado. Waxaad kutubta ku arki kartaa qaarkood xadiis leh maalinta caashuura waa in la meydho, waa in dhar qurux badan la xidho sidii ciida oo kale, waa in dumarka iyo caruurta laga farxiyo, waa in la indho

kuushado oo fadli weyn ayaa ku jira ay yidhahdeen, waa in farxad la muujiyo. Waa kuwo aad moodo in ay ku faraxsan yihiin dilkii Xuseen Ibnu Cali. Kuwa kale waxa ay sameyneyaan maanta waala arkey oo waxa ay sameyneyaan wax islaamka iyo ehelkiisaba lagu quursado oo kuwo mucammamiin ah oo manaabirta u saaran oo iyagu bir aaney is taabsiineyn laakin masaakinta juhaasha ah ku ciyaaraya oo fadli ugu sheegeya in ay is jeex jeexaan oo ubadkooda seefo ay ku bashaaqiyaan. Ma waxaasaa Ilaahay lagu caabudaa? Waxa qudha ee sunnada ah maalintaa caashuura waa in la soomo wax kale oo Rasuulku ﷺ inoo sheegey ma jirto.

Ilaahay ayeynu ka magan geleynaa bidaca, Ilaahay ayeynu uga bari noqoneyaa bidcada, shiico iyo kuwo kaleba.

Magaca khudbada : Soonka Caashuura – (صيام عاشوراء)

Shaykh Cabdilaahi Barbaraawi

www.Manhajonline.com